

Somalisk

Ku khasab daweynta cilmi nafsiga

- xuquuqda qofka maskaxiyan u jirran, marka khasab lagu daweynayo

SUNDHEDSMINISTERIET
Wasaaradda caafimaadka



Ku bukaanka,

ehelada iyo lataliyeyaasha bukaanka

Talo bixintaan waxaa loogu tala galay bukaanka maskaxda ka jirran, eheladooda iyo lataliyeyaasha bukaanka. Talo bixintaani waxay wax ka sheegaysa sharciyada ka jira, marka bukaan khasab lagu seexiyo ama lagu hayo cusbitaalka qaybtiiisa cilmi nafsiya.

Waxay kaloo tilmaamaysaa sharciga iyo xuquuqda ay leeyihii bukaanka maskaxda ka jirran oo ku jira cusbitaalka qaybtiiisa cilmi nafsiya marka khasab lagu daweyyo ama sariirta lagu xiro.

Sharciga nr. 849 oo soo baxay 2.deseembar 1998 wuxuu ku saabsanyahay xornimo ka qaadka iyo jajuubka kale ee loo isticmaalo bukaanka maskaxda ka jirran. Talo bixintani fikrad guud keli ah ayay ka bixinaysaa

sharciyadaas. Haddii aad faahfaahin sharciyadaas uga baahatid, waxaad ka heli karta qoraalkan boggiisa dambe. Waxaa kale oo aad ka heli kartaa diiwaanka hay'adaha dowladda ee muhiimka ah.

Sharci gooni ah, ayaa ka jira bukaanka lagu xukumay in la dhigo cusbitaal iyadoo loo cuskaday xeer ciqaabeedka ama qofku dambi uu galey awgeed maxkamadi ay ku xukuntay in bukaanka lagu hayo cusbitaalka qaybtiiisa cilmi nafsiya.

Sharciyadaasi kuma qorna tala bixintaan, lakiin waxaa laga heli karaa wasaaradda caddaaladda sharciyadeeda ku saabsan dadka la dhigo cusbitaalka qaybtiiisa cilmi nafsiya iyadoo loo cuskanayo xeer ciqaabeedka.

Goormaa khasab la
isticmaali karaa?



Bukaanka waxaa lagu xiri karaa oo keli ah suun dhabar kaa soo looga xirayo gacmaha iyo lugaha, waxaa kaloo loo gelinaya gacmaha gashi. Haddii bukaanka lagu xiro suun dhabar waa in loo qabtaa waardiye joogto ah.

Waa la oggolyahay bukaan in la xirxiro, si looga hor tago in isagu ama iyadu isu soo jiidaan dhib ula qasdi la'aan ah (xiritaan difaac).

Goormaa la isticmaali karaa jajuub?

Jajuub - shaqaaluhu waxay jajuubi karaan bukaan marka uu naftiisa khatar galinayo, dabaggal ama

dhibaato weyn u gaysanayo cid kale ama uu samaynayo qarribaad iyo burburin badan. Bukaanka raba inuu ka fakado cusbitaal khasab loogu hayo, waa loo isticmaali karaa jajuub. Haddii marna laga maarmi waayo, waxaa dhakhtarku amri karaa bukaanka aan xasilloonayn in khasab lagu siijo dawo dajisa.



Lataliye bukaan



**Sidee looga soo
baxaa cusbitaalka?**



Xaggee loo dacwoon karaa?

Xaggee loo dacwoon karaa?

Haddii bukaan la jajuubay, waxaa bukaanka ama bukaan lataliyuhu dalban karaan in arrinta la hor dhigo guddiga deegaanka ee qaabilsan dacwada bukaanka cilmi nafsiya.

Dacwada waxaa loo soo bandhigi kara bukaan lataliyaha, cusbitaalka dhakhtarradiisa, kalkaaliyeeyashiisa, xannaaneeyayaashiisa ama qofkii kale oo ka qayb qaata daweynta. Dacwada waxaa toos loogu diri kara mas'uuliyiinta cusbitaalka. Sida maamulka cusbitaallada magaalaa

madaxda ama tan gobolka. Waana inay sida ugu dhakhsaha badan dacwada ugu gudbiyaan guddiga deegaanka ee qaabilsan.

Haddii bukaanku ka dacwoodo daweynta khasabka ah, waa in arrinta dib loo dhigaa. Lakiin dhakhtarku waa uu bilaabi karaa daweynta khasabka ah, intaan dacwada qaraar laga gaarin, haddii uu muhiim u arko in la daaweyyo bukaanka si'uusan caafimaadkiisa ama naftiisa khatar u galin ama looga hor tago inuu cid kale dhib u geysto.

Sharciyada nr. ku daweynta ama dhigidda qofka cilmi nafsiga

Sharciga qodobkiisu yahay 849 ee soo baxay 02.12.1998 kuna saabsan xornimo ka qaadka iyo jajuubka kale ee loo isticmaalo daweynta cilmi nafsiga.

Sharciga nr. yahay 880 ee soo baxay 10.12.1998 kuna saabsan dariiqada khasab ku seexinta cusbitaallada.

Sharciga nr. yahay 878 ee soo baxay 10.12.1998 kuna saabsan xog warranka iyo talabixinta bukaanka kolka jajuub loogu gaysto daweynta cilmi nafsiga.

Sharciga nr. yahay 938 ee soo baxay 15.12.1998 kuna saabsan dariiqada ay bukaanka cilmi nafsi u maraan dacwada.

Sharciga nr. yahay 878 ee soo baxay 10.12.1998 kuna saabsan khasab ku daweynta, ku xirxiridda, diiwaan maalneedka iwm ee laga isticmaalo qaybaha cilmi nafsiga.

Sharciga nr. yahay 78 ee soo baxay 29.01.1999 kuna saabsan bukaan lataliyaha.

Sharciga nr. yahay 77 ee soo baxay 05.02 1999 kuna saabsan qofka masuulka ah

Sharciga nr. yahay 892 ee soo baxay 14.12.1998 kuna saabsan bukaanka lagu seexiyay cusbitaalka cilmi nafsiga xukun maxkamadeed.



Udgivet februar 2001

Oplag: 9.500

Design, produktion og tryk: DataGraf Auning AS

Cinwaano:

Wasaaradda caafimaadka
Holbergsgade 6
DK-1057 København K
Telefoon: 33 92 33 60

Wakaaladda caafimaadka
Amaliegade 13
Postboks 2020
DK-1012 København K
Telefoon: 33 91 16 01

**Hay'adda caafimaadka ee
dacwada bukaanka**
Frederiksborggade 15
DK-1360 København K
Telefoon: 33 38 95 00

Wasaaradda cadaaladda
Slotsholmsgade 10
DK-1216 København K
Telefoon: 33 92 33 40

**Afhayeenka xeerdajinta
baarlamaanka**
Gammel Torv 22
DK-1457 København K
Telefoon: 33 13 25 12

Kormeerka §71
Christiansborg
DK-1218 København K
Telefoon: 33 37 55 00